Arbetsförmedlingen

Etableringsersättning -
för dig som är ny i Sverige

Somaliska

Gunnada shaqo meelaynta ee khuseeysa adiga waddanka Iswiidhan ku cusub

Warbixintaan waxay ku socota adiga uu khuseeyo qaanuunka (2010:197) ee taageerada meelaynta qaar ka mid ah soo galoytida wadanka ku cusub.

Goormu hirgeleya gunnada shaqo meelaynta?

Marka aad adiga iyo shaqo xidhiidhiyaha aad sameysan qorshaha meelaynta markaa ayaad xaq u leedahay gunnada shaqo meelaynta. Xatta waad heli kartaa gunnada shaqo meelaynta marka aad qorshaha meelaynta aad fulinaysan.

Qorshaha meelaynta waxaa ka mid ah firfircooni adiga ku caawimeysa sidii aad si dhakhso leh ugu baran lahayd luuqadda iswiidhishka, u heli lahayd shaqo iyo sidii aad masruufka dhaqaalaha u soo saaran lahayd.

Dalabka gunnada shaqo meelaynta

Waa annaga ka shaqeeya Xafiiska xiriirka shaqada kuwa gaaraya go'aanka gunnada shaqo meelaynta kadib marka aad noo soo gudbiso dalabka.

Foomka dalabka ee gunnada shaqo meelaynta waxaad ka heleysa Xafiiska xiriirka shaqada.

Wargeli koontada bangiga

Waa khasab in aad wargeliso Qasnadda Caymiska "Försäkringskassan" koontada bangiga haddii aad rabto in gunnada shaqo meelaynta koontada laguugu soo diro. Markaasna waa in aad buuxisa oo aad soo dirta foomka 5605, howsha lacag bangi dhigidda ee Qasnadda Caymiska "uppdrag kontoinsättning, Försäkringskassan". Annaga ka shaqeya Xafiiska xiriirka shaqada ayaa kaa caawin kara buuxinta foomka.

Goormu laakiin hirgaleyn gunnada shaqo meelaynta?

Ma aad heli kartid gunnada shaqo meelaynta haddii aad kaalmo dhaqaale ka qaadatid Hay'adda socdaalka sida uu dhigayo qaanuunka (1994:137) ee qaabbilaadda magangelyo doonka iyo kuwa la mid ah.

Xatta ma aad heli kartid gunnada shaqo meelaynta adiga qaata:

- lacagta bukaanka- ama gunnada dadka aan shaqayn karin
- lacagta bukaanka
- lacagta baxnaaninta
- lacagta gunnada ee dumarka uurka leh
- lacagta gunnada waalidka

- lacagta gunnada waalidka ee ku meelgaarka ah
- masariifta gaarka ah ee qofka ku dhawacma shaqada
- lacagta qaraabada
- kaalmada dhaqaale ee cudur sidaha
- mushaarka bukaanka

Xaq uma lihid in aad qaadato gunnada waxbarashada ee ay bixiso Xarunta kaalmaynta waxbarashada (CSN) muddada aad qaadaneyso gunnada shaqo meelaynta.

Lacagta la bixinayo inta ay dhan tahay

Lacag bixinta marka aad sameynayso qorshaha meelaynta

Waxaad xaq u leedahay gunnada shaqo meelaynta marka aad adiga iyo qofka u qaabilsan xidhiidhka shaqada sameyneysan qorshaha meelaynta. Lacag bixintuna waa 231 kr maalintii, shanta maalmood ee toddobaadka. Lacag bixintana waxaa la bixiya laba jeer bishii.

Lacag bixinta muddadda aad ka qayb qaadaneyso howsha

Marka aad ka qayb qaadaneyso howlaha ka midda qorshahaga meelaynta waxaad qaadaneysa gunnada shaqo meelaynta, oo ah ugu badnaan 308 karoon maalintii. Lacag bixintana waxaa loo xisaabinaya shanta maalmood ee toddobaadka iyo iyadoo lacagtaas la bixinayo bishii hal mar. Caddadda lacag bixinta waxay ku xiran tahay qorshahaaga la qabsiga baaxaddiisa.

Lacag bixinta haddii aad carruur ledahay ama kiradu qaali tahay

Markaas waxaad xaq u yeelan kartaa lacag bixin aad ka dalbaneyso Qasnadda Caymiska ”Försäkringskassan” haddii aad carruur leedahay ama ijaarka gurigu qaali yahay. Markaaso aad dalbaneyso lacag bixinta guriga ama kordhinta gunnada shaqo meelaynta oo aad ka dalbaneyso Qasnadda Caymiska ”Försäkringskassan”.

Annaga ka shaqeeya Xafiiska xiriirka shaqada ayaa kaa caawimi kara si aad u buuxiso dalabka laakiin waa Qasnadda Caymiska kuwa go’aaminaya haddii aad xaq u leedahay lacag bixintaas.

Haddii aad shaqayso wax bey iska dhimayaan lacagaha gunnada sal-dhigida [etableringsersättningen]

Haddii aad shaqayso, taasoo ku salaysan qorsheha sal-dhigida adiga ku gaarka ah, waxaa wax iska dhimayo lacagaha gunnada sal-dhigida [etableringsersättningen] ee lagu siiyo.

Haddiise aad shaqo haysato, taasoo aan ku salaysan qorsheha sal-dhigida adiga ku gaarka ah, xaaladaas waxba iska ma dhimayso lacagaha gunnada sal-dhigida [etableringsersättningen] ee lagu siiyo.

Waa khasab in aad soo gudbiso xisaab xidhka bisha si gunnada shaqo meelaynta lagugu soo diro

Bil walba dhamaadkeed waxaa khasab kugu ah in aad wargeliso Xafiiska xiriirka shaqada in aad ka qayb qaadatay howl qabadka iyo in aad noo sheegto sababta haddii aad ka qayb qaadan. Taaso aad ku qoreyso foomka la yiraahdo Xisaab xidhka bisha ee gunnada shaqo meelaynta ”Månadsredovisning för etableringsersättning” kaaso aad annaga ka shaqeeya Xafiiska xiriirka shaqada ka heli karto. Waana khasab in qabanqaabiyaha howl qabadka uu soo saxiixo xisaab xidhka bisha.

Ma aad heli kartid lacag bixinta in bil la sii hormariyo ama inta aad ka soo gudbineyso xisaab xidhka bisha. Waa adiga qofka mas’uulk ka ah in xisaab xidhka bisha loo soo gudbiyo Xafiiska xiriirka shaqada.

Maxaa dhacaya haddii qofku maqnaado?

Haddii aad ka maqnaato howl qabadka waxaad lacag bixinta gunnada shaqo meelaynta heli kartaa oo keliya haddii maqnaantaadu ay ahayd bukaan, daryeel carruur ama annaga Xafiiska xiriirka shaqada haddii aan kuu oggolaanay in aad fasax ahaato. Maaqnaanshuhu waa in uu ahaan mid ka badan 30 maalmood ee isku xigga.

Maqnaan aan la oggolaan iyo muddo dheer oo maqnaan 30 maalmood oo isku xigga ka badan waxaa wax laga dhimaya gunnada shaqo meelaynta iyo kaalmadda ijaarka guriga haddii aad kaalmaddas qaadato.

Haddii aad maqnaato waa khasab in aad soo wargeliso shaqaalaha ka shaqeeya Xafiiska xiriirka shaqada oo aad wargeliso wakhti hore ama maalinta ugu horeysa ee maqnaanta. Haddii aad soo wargelin waxaa dhici kara inaad helin lacag bixin muddadda aad maqnayd. Waa in aad soo bandhigta maqnaantaada, kuna soo bandhigtaa foomka Månadsredovisning för etableringsersättning ”Månadsredovisning för etableringsersättning”.

Maxaa dhacaya marka aad jirato?

Maalinta ugu horeysa bukaanka oo lacag la’aanta ”Karensdag”

Maalinta ugu horeysa ee aad jirato waa lacag la’aan ”karensdag”. ”Karensdag” macnahiisu wuxuu yahay inaad lacag laheyn maalinta ugu horeysa ee bukaanka. Marnaba lacag lagaama jari karo in ka badan tobban maalmood ee malmaha ugu horeya bukaanka xilli dhan labo iyo tobban bilood gudahood.

Haddii aad shan maalmood gudahood ee xilli jiro aad mar kale jirato wax lacag ah lagama jarayo maalinta ugu horeysa ee bukaanka.

Haddii aad jirato muddo dheer oo ka badan 30 maalmood oo maalmo isku xigga ah markaa gunnadda shaqo meelaynta waa lagaa joojinaya. Haddii aad 30 maalmood kadib caafimaaddo oo aad dib ugu noqoto howl qabadka markaa waa ay kuu bilaabaneysa lacag bixinta gunnada shaqo meelaynta.

Is qorid xanuun

Marka aad jirato waa khasab in aad la xiriirto Xafiiska xiriirka shaqada oo aad is qorto in aad jiran tahay. Is qoridda xanuunka waa in aad sameysa maalinta ugu horeysa ee aad jirato.

Caymiska daryeelka caafimaadka

Haddii aad jiraneyd waa in aad soo gudbisa warbixinta xanuunka iyo sida xanuunku raad ugu yeeshay awoodaada wax qabad ee ka qayb qaadashadda howl qabadka. Taaso aad ku soo qorayso foomka xisaab xidhka bisha ee gunnada shaqo meelaynta ”Månadsredovisning för etableringsersättning”.

Caddayn dhakhtareed

Haddii aad muddo ka badan toddoba maalmood jiranaato laga bilaabo maalinta aad is qortay in aad jiran tahay, waa in aad soo gudbisa caddayn dhakhtar oo u soo dirtaa Xafiiska xiriirka shaqada. Caddeynta dhakhtarka waa in ay ku qeexan tahay in aad ka qayb qaadan karin howl qabadka uu ka kooban yahay qorshaha howl qabadka sababtuna tahay xanuunka ku haya awgiis. Si aad ku hesho warqadda caddeynta dhakhtarka waa khasab in aad booqato laanta caafimaadka ee aad ka tirsan tahay oo dhakhtar aad la kulantaa.

Daryeel carruur (VAB)

Marka aad daryeeleyso carruur xanuunsan oo da’doodu ka yar tahay tobban iyo labbo sano waxaad xaq u leedahay gunnada shaqo meelaynta. Laakiin wax lacag bixin ah lama bixinayo haddii aad u maqnaato daryeel carruur muddo ka badan 30 maalmood oo isku xigga.

Waxaad xattaa mararka qaarkood guriga la joogi kartaa carruur daryeel xanuun u baahan da’dooduna aan weli gaarin ilaa iyo 16 sanno. Tusaale ahaan xanuun khatar ah haddii ay qabaan, howl qabadka jirkooda oo howlgab ah ama ay khasab noqoto in aad carruurta u raacdo dhakhtarka. Sababo gaar ah ayaa jira markaasna waa muhiim in gebi ahaan uu ansaxiyo xiriiriyaha shaqada. La hadal xiriiriyaha shaqada haddii uu shaki kaaga jiro waxaad sameyn laheyd.

Marka carruurtu jirato waa khasab in aad la xiriirto Xafiiska xiriirka shaqada oo aad iska qorto. Iska qoridda daryeelka carruurta waa in aad soo wargelisa maalinta ugu horeysa ee ay khasab kugu noqoto in aad ka maqnaato howl qabadka sababtuna tahay carruuta oo jiran.

Ka maqnaanshada in ka badan toddoba maalmood, taasoo u sabab ahayd daryeelida cunug xannuunsana, waa inaad Xafiiska Shaqada u keenta caddaynta xannuunkaas. Caddaynta noocaas ah waxaa ku qori karo qof takhtar ah ama kalkaalisada caafimaadka.

Fasax la oggolaaday

Marka Xafiiska xiriirka shaqada kuu oggolaado fasax waxba lagama dhimayo gunnada shaqo meelaynta. Sababta oggolaanta fasaxa waxay noqon kartaa tusaale ahaan booqasho dhakhtar, cudur khatar ah ee ku dhaca qof aad isu dhowdihiin, dhimasho qof aad isu dhowdihiin, xabaalid, diiwan gelinta hantida qofka dhintay, qaybinta dhaxalka, guurid, booqasho xafiiska Qasnadda Caymiska ”Försäkringskassan” ama booqashadda mas’uulka arrintaada ee degmada ama haddii imtixaan baabuur wadid aad geleysid laakiin waa haddii baahi ay jirto shaqada aad qaban doonto. Xattaa mararka qaarkood waxaa laguu oggoalan karaa fasax si aad u keento carruurtaada oo waddanka dibadiisa ku nool.

Fasaxa waa in uu ansaxiyaa shaqo xiriiriyaha mas’uulka kaa ah.

በዚ ዝስዕብ ቕትረቕቡና ትኽእሉ ኢኹም (Tigrinja)
ቴሌፎን 0771 86 01 04

(Arabiska) للتواصل معنا
هاتف 0771 86 01 01

Звоните нам (Ryska)
по телефону 0771 86 01 05

(Persiska) با ما تماس گرفتن
تلفن 0771 86 01 02

Nagala soo xiriir (Somaliska)
Telefonkan 0771 86 01 03

arbetsformedlingen.se
0711-416 416